

Martigeli Munaasabada Tallaalka Bulshada!

5/26/2021



Isdiiwaangeli si aad ugu qabato munaasabada tallaalka bulshadaada dhexdeeda

Haddii aad danaynayso inaad martigeliso munaasabada tallaalka ee loogu talagalay dadka ka tirsan bulshadaada oo aad u baahan tahay xoogaa caawimaad ah si aad u qabato, fadlan buuxi

[Foomka Codsiga Munaasabada Tallaalka Bulshada \(https://app.smartsheet.com/b/form/670f865fdef5494cbab079487b58dd45\).](https://app.smartsheet.com/b/form/670f865fdef5494cbab079487b58dd45)

Ka ogow wax badan oo ku saabsan waxa ay ka dhigan tahay martigelinta munaasabada tallaalka oo ka buuxi Foomka Codsiga Munaasabada Tallaalka Bulshada barta:

[Martigeli Munaasabada Tallaalka COVID-19 ee Bulshada \(www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/vaccine/hostevent.html\)](http://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/vaccine/hostevent.html)

Mudnaan ayaa la siin doonaa munaasabadaha loogu adeegayo bulshooyinka haysta kheyraadka yar ee la aqoonsaday iyadoo la adeegsanayo [Tusaha Nuglaanta Bulshada ee CDC \(www.atsdr.cdc.gov/placeandhealth/svi/index.html\)](http://www.atsdr.cdc.gov/placeandhealth/svi/index.html).

Maalgelin ayaa la heli karaa

Maalgelin yar ayaa la heli doonaa si gacan looga geysto kharashaadka kooxaha bulshada ee loo xushay in lala kaashado munaasabadaha tallaalka bulshada.



Minnesota Department of Health | health.mn.gov | 651-201-5000
625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

La xiriir health.communications@state.mn.us si aad u codsato khidmad kale. (Somali)